## U qalmida Katanaasulida

Dadka qaata waa in ay kasoo baxaan dhammaan shuruudaha:

- In uu noqdo macmiil u qalma Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) sida ku cad xeerka RCW 71A.10.020(5).
- Qabtid naafo sida waafaqsan shuruuda lagu qoray Qaanuunka Dammaanada Bulshada.
- In uu codsado daryeelka adeegyada muddada-dheer ah/ Medicaid oo uuna xaqiijiyo dakhli aan dhaafin 300% ee ah heerka dheefta federaalka ee caadiga ah ee SSI.
  - Haddii uu ilmo yahay, dakhliga iyo kheyraadyada waalidka lama tixgeliyo.
  - Haddii uu yahay qof weyn oo la nool xaas/nin, dakhliga iyo kheyraadyada xaaska/ninka lama tixgeliyo.
- In uu haysto kheyraad dhaqaale oo ka yar $2,000 ama waa in uu ku jiraa barnaamijka Apple Health ee loogu talogalay Shaqaalaha Naafada ah (HWD).
- In uu ka soo baxo heerka daryeelka lagu bixiyay gudaha Xarunta Daryeelka Dhexe ee loogu talogalay dadka qaba Naafonimada Caqliga sida lagu xaddidey dhinaca Qiimeynta Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA).
- Qorshaha adeegga qofka-xuddunta u yahay ayaa wuxuu muujinayaa sida baahiyada caafimaadka qofka, bedqabka, iyo baxnaaninta loogu buuxin karo gudaha bulshada oo leh adeegga ka-tanaasulidda bilaha ah iyo/ama korjoogteyn.
- In uu oggolaado aqbalidda adeegyada ku salaysan-bulshada iyo guriga bedelkii uu oggolaan lahaa ICF/IID.




## Helidda Ka-tanaasulidda

Codsi isqorid ah, ama loogu bedelanayo ka-tanaasulid bedel ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Weydii maamulaha xogta kiiska. Haddii aan joogin maamulaha xogta kiiska, ku dhaaf fariin khadka Adeega Lacag-La'aanta ah ee lagu qoray hoosta Xafiisyada Gobolka ama ugu soo dir codsiga si toos-ah internetka cinwaankan **www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request**. Shuruuda kasoo bixida adeega ee loogu talogalay katanaasulida ma ahan mid dammaana qaadaysa helida adeegaha. Katanaasulid kasta waxay leedahay xad dadka loo adeegayo ah. Maamulka Naafooyinka Koriinka wuxuu haystaa awood uu ku xadido isqorida la isku qoro katanaasulida kusalaysan helida maal-gelin loogu talogalay kaqayb galayaasha katanaasulida cusub.

## Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo dhageysiga maamul la xiriira oo leh go'aamadan soo socda iyada oo aan la eegayn barnaamijka ama adeegga:

- U qalmida Maamulka Naafooyinka Koriinka la diiday, la joojiyey ama Maamulka Naafooyinka Koriinka uu sameeyo ficil dib u dhigid aan macquul ahayn oo kusaabsan codsigaaga; ama
- Nooca ama tirada adeega laguu oggolaaday in aad heshid; ama
- Diidis, dib u dhimis, ama joojinta adeegaha; ama
- Diidis doorashada adeega ah ee uu diido bixiyaha adeega; ama
- Haddii loo guuriyo deegaan kale, midkaas oo aan ahayn mid uu qofku doortay; ama
- Diidis Maamulka Naafooyinka Koriinka ah oo uu diido in uu u hoggaansamo codsigaaga ah in aanan oggaysiisyo loogu dirin qofkale; ama
- Ka saarid lagaa saaro barnaamijka ka-tanaasulidda; ama
- Diidista codsiga lagu helayo adeegyada ICF/IID bedelkii adeegyada ka-tanaasulidda; ama
- Maamulka Naafooyinka Koriinka uu go'aansado in adeegaha lagu helo katanaasulida hadda ahi ay kasoo baxayso baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan u baahnayn heerka daryeelka ICF/IID.




Internet-ka nagu soo booqo halkan:
*dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request*

Ka raadi xafiiska halkan:
*dshs.wa.gov/office-locations*

Nasoo wac:

| Degmooyinka | Teleefoonka iyo limaylka |
|---|---|
| Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens | (800) 319-7116<br>R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima | (866) 715-3646<br>R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov |
| Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom | (800) 567-5582<br>R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| King | (800) 974-4428<br>R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov |
| Kitsap, Pierce | (800) 735-6740<br>R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum | (888) 707-1202<br>R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov |

*Dadka u baahan taageero lagu taageero maqalka ama xiriirka waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Teleefoonka Washington ayaga oo garaaca 7-1-1 ama 1-800-833-6388 (TTY).*

Washington State
Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

DSHS 22-1754 SM (Rev. 10/20) Somali

# Ka-tanaasulida Aasaasiga ee Dheeraadka ah

**Ka ahaada dhinaca Maamulka Naafooyinka Koriinka**



Washington State
Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

# Dulmarka Katanaasulida

Maamulka Naafonimada Koriinka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ayaa wuxuu leeyahay shan barnaamijyo Ka-tanaasulid Medicaid oo ah Adeeg Ku salaysan-Guriga iyo Bulshada. Katanaasul kasta wuxuu bixiyaa adeego gaar ah si looga soo baxo baahooyinka ammaanka iyo caafimaadka gudaha bulshada ah. Katanaasulida Aasaasiga Dheeraadka ah wuxuu bixiyaa adeego kaladuwan oo aan lagu helin tooska illooyin kale (ceymiska khaaska ah, Caawimaada caafimaadka (Medicaid), iskuul, iwm.)

Katanaasulida Aasaasiga Dheeraadka ah wuxuu taageerayaa dadka u baahan adeegaha katanaasulida si loo buuxiyo baahooyinkooda caafimaad iyo daryeel ee lagu qiimeeyay gudaha bulshada. Adeegaha lagu bixiyo gurigooda, guriga qoyska, ama Guriga Qoyska Qof weyn ama Xarunta Deegaanka Qofka weyn. Katanaasulida Aasaasiga Dheeraadka ah waxaa la siiyaa dadka da' walba oo ay yihiin.

Haddii baahida qiimeynta lagu sameeyay adeegaha ay dhaafto baaxada adeega lagu bixiyay hoosta katanaasulida Aasaasiga Dheeraadka ah, Maamulka Naafooyinka Koriinka wuxuu samayn doonaa hal ama wax ka baddan oo dadaalada soo socda ah si aad uga soo baxdid baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka:

- In uu aqoonsado taakulooyin dabiici dheeraad ah;
- Biloowdid ka reebid xeerka lagu helo adeegaha aan katanaasulida ahayn ee la heli karo kuwaas oo aan ku jirin katanaasulida Aasaasiga Dheeraadka ah ee aan ahayn taakulooyinka dabiiciga ah;
- Waxay bixiyaan codsiga lagu codsanayo ka-tanaasulid bedel ah taas oo leh adeegyada loo baahan yahay;
- Lagu siiyo bedelid ku saabsan ICF/IID .

Haddii midna doorashooyinka kor ku qoran kasoo bixin baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka, Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) waxaa dhici karta in ay joojiso xaq-u-yeelashada ka-tanaasulidda. Haddii laga joojiyo ka-tanaasulidda, shakhsiga waxaa dhici karta in uu u qalmo adeegyada Maamulka Naafonimada Koriinka ah (DDA) ee aan-ka-tanaasulidda ahayn.

# Adeega Katanaasulida

U isticmaal qoraalkan yar si aad ugu qorshaysatid qiimeynta sannadlaha ah. Maareeyaha kheyraadka kiiska wuxuu sharxi doonnaa adeegyada iyo shuruudaha, iyo adeegyada dokumentiga ee lagu doortay gudaha qorshaha Adeegga uu qofka-xuddunta u yahay. Qaar kamid ah adeegaha waxay u baahanyihiin muraajaco iyo oggolaansho kahor inta aan la keenin. Weydii maamulaha xogta kiiska (CRM) waxyaabaha ku saabsan nooca macluumaadka u baahan oggolaansho hore. Adeegaha ah afar qaybood kuwaas oo leh xad da' ah waxaa kamid ah:

- *Adeegaha bulshada* – waxay kor u qaadaan kaqayb galka macamiilka iyo dhexgalka bulshada
- *Adeegaha xirfadeed* – adeegaha taakulada laga bixiyo dhinaca xirfadlayaal qandaraas lala galo
- *Adeegaha daryeel bixinta* – taakulooyin la siiyo kaqayb galayaasha iyo daryeel bixiyayaashooda
- *Badeeco iyo adeego* – qalab, alaab iyo adeego khaas ah oo la siiyo kaqayb galayaasha

***Isticmaal khaanadaha la doorto si aad u tustid maamulaha xogta kiiska (CRM) adeegaha aad danaysid:***

## Adeegyada Bulshada

- ☐ **Ka-qaybgalka bulshada** – taageero ama taakulayn kor loogu qaadayo xiriirada iyo ka-qaybgalka kheyraadyada bulshada.
- ☐ **Ka mid noqoshada bulshada** – adeegyo taakulayn gaar ah kuwaas oo dadka ku xiraya bulshada degaankooda si ay xiriir ula samaystaan dadka kale ee ay isku danaha yihiin.
- ☐ **Shaqo la taakuleeyay** – taakulo kooxeed iyo mid shakhsiyeed joogto ah, degdeg ah si loo helo loona haysto shaqo. *21+*
- ☐ **Gaadiid** – magdhow lasiiyo bixiyaha gaadiidka aan ahayn-mid caafimaad ee loogu baahanyahay in lagu helo adeegaha katanaasulka lagu xadiday qorshaha adeega qofka-bartamaha ah/qorshaha taageerada qofka.

## Adeegyo Xirfadeed

- ☐ **Adeegyada xasilinta** – Caawimo iyo taageero inta lagu guda jiro dhibaatooyinka caafimaadka hab-dhaqanka. Adeegyada waxaa ka mid ah baxnaanin gaar ah, wada-tashiga qoyska/shaqaalaha iyo adeegyada sariirta leexinta dhibaatada.
- ☐ **Taakulada hab dhaqanka wanaagsan iyo latalinta** – taakulooyin lagu qiimeeyo laguna sheego baahooyinka caafimaadka hab dhaqanka. Kuwaan waxaa ka mid ah waxqabadyo kor loogu qaadayo hab-dhaqannada sii wanaajinaya tayada nolosha iyo ka mid noqoshada bulshada. *0-20*
- ☐ **Qiimeynta khatarta** – qiimeyn rabsho, daba gelid, rabsho galmo, ama hab dhaqan weerarid ah si loo xadido baahida loogu talogalay adeegaha daaweynta ama caafimaadka, nafsaaniga ah.
- ☐ **Baxnaanin gaar ah** – taageerada shakhsiyeed ee lagu baranayo ama lagu joogteynayo xirfado nololeed kala duwan.
- ☐ **Wada-tashiga qoyska/shaqaalaha** – tababar xirfadeed iyo la-talinta qoyska iyo adeeg bixiyayaasha tooska ah si loo sii wanaajiyo in laga soo baxo baahiyada shakhsi. La-talin ayaa la heli karaa.
- ☐ **Daaweyn** – adeego dhagaysi iyo luuqad, jireed iyo hadal, shaqo ka baxsan kuwa laga bixiyo dhinaca Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Health). *21+*

## Adeegyada Daryeel-bixinta

- ☐ **Nasasho** – nasasho muddo-gaaban oo la siiyo dadka la nool oona daryeela macaamiisha.
- ☐ **Kalkaalin xirfadle** – ba'an, muddo-dheer, adeegyada wax looga qabanayo baahiyada aanan looga soo baixin Medicaid (Apple Care). *21+*

## Alaabta iyo Adeegyada

- ☐ **Baabi'inta cayayaanka sariirta gala** – daaweyn lagu daaweeyo cayayaanka sariirta gala ee guriga.
- ☐ **La-qabsashada daaweynta ah** –wax-ka-beddelka deegaanka guriga si loo yareeyo ama meesha looga saaro walbahaarka.
- ☐ **Laqabsashada deegaanka** – hagaajin muuqaal oo lagu sameeyo waxyaabaha guriga lagama maarmaanka u ah ee khuseysa qofka kusii noolaanaya gudaha bulshada.
- ☐ **Qalab iyo alaab daaweyn khaas ah** – qalabka iyo alaabta loo baahanyahay ee aan lagu helin hoosta Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Care) ay kamid tahay qalabka iyo alaabta loo baahanyahay si loo fuliyo qorshaha taakulada hab dhaqanka wanaagsan ama daaweynta.
- ☐ **Waxbarid ficnaansho** – warqad waxbarid qoran qofeed, bileed, midaas oo loogu talogalay in lagu caawiyo maamulida arimaha xiriirka la leh caafimaadka iyo gaarida ujeedooyinka ficnaanshaha.